

Su'aalaha badanaa nala soo waydiiyo (FAQs)

Shaqadeenna	2
Isdiiwaangelinta si loo codeeyo	4
Hababka cod-bixinta	7
Cod-bixinta qof ahaan ama Meesha la tegayo (in person)	9
Aqoonsiga Cod-bixiyaha ee Sawirka leh (Photo Voter ID)	10
Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Aqoonsiga Cod-bixiyaha ee Sawirka leh	13
Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Shahaadada Voter Authority Certificate ee Bilaashka ah	15
Cod-bixinta Boostada iyo Wakiilka (Postal and Proxy Voting)	17
Codbixinta si qarsoodi ah (Voting anonymously)	18
Faa'iidooyinka isdiiwaangelinta codbixinta iyo lahaanshaha aqoonsi sawir leh oo la aqbalayo	21
Hannaanka codbixinta (Voting systems)	21
Xogtayda	22
Astaanta sharciyeysan iyo tan dhijitaalka ah (Legal and digital imprints)	22
Alaabooyinka iyo ilaha dheeraadka ah ee laga heli karo – gaar ahaan kuwa dadka codbixiyeyaasha ah	22

Shaqadeenna

Wa ayo Greater London Authority (GLA)?

Greater London Authority (GLA), oo sidoo kale loo yaqaan London City Hall, waa maamulka ama dowlada goboleedka London, waxayna sharci ahaan ka shaqeysaa guud ahaan Greater London iyo magaalada London. GLA waxa uu ka kooban yahay Duqa Magaalada London iyo Golaha Baarlamaanka London.

Wa ayo Shout Out UK?

Shout Out UK (SOUK) waa hay'ad bulsho oo madax bannaan, lehna hal abuur, kana shaqeysa sare u qaadista wacyiga warbaahinta iyo fahamka siyaasadeed ee dhalinyarada. SOUK waxay ahayd kooxda fulisay (ama kala hawlgashay s) barnaamijka toddobaadka isdiwaangelinta cod-bixiyeyaasha London (2020–2025), kaas oo ay abaabushay GLA (Greater London Authority). Waxay sidoo kale qayb ka ahaayeen barnaamijyo kale oo GLA leedahay, oo dadka ku dhiirrigelinayay inay ka qaybqaataan doorashooyinka, xuquuqdooda muwaadinnimo, iyo arrimaha bulshada.

Waa maxay Barnaamijka GLA ee Ka-Qaybgalka Muwaadiniinta iyo Dimuqraadiyadda?

Barnaamijka GLA ee Ka-Qaybgalka Muwaadiniinta iyo Dimuqraadiyadda waa barnaamij sanadle ah, oo aan wax xisbiya ku lug lahayn, kaas oo ujeedkiisu yahay in lagu taageero dhammaan dadka London degan, gaar ahaan kuwa aan si buuxda u diiwaangashanayn ama aa matalaad dhaba haysan, si ay u helaan xuquuqdooda muwaadinimo iyo dimuqraadiyadeed.

Barnaamijkan waxaa hoggaamiya GLA, waxaana si wadajir ah ula shaqeeya Electoral Commission (Guddiga Doorashooyinka) iyo maamulka degmooyinka. Waxaa la fuliyay iyadoo lala kaashanayo hawlgalka bulsho, oo hadda ah Shout Out UK (SOUK). Qalabka wacyigelinta iyo hawlaha la qabto waxaa si wadajir ah u naqshadeeya bulshada aan sida buuxda uga dhex muuqan, waxaana lagu gaadhsiiyay bulshada iyadoo loo marayo qaab online iyo mid fool-ka-fool ah, iyada oo ay taageerayaan ururo kala duwan oo ka shaqeeya guud ahaan London.

Dhanka kale, si wax loogu daro hawshaas, hay'adaha deeqaha ka helay barnaamijka GLA ee ka-qaybgalka dimuqraadiyadda waxay howlo ka fuliyeen goobo lagu kalsoon yahay oo bulshadu iskugu timaado. Waxaad macluumaad dheeri ah ka heli kartaa GLA Democracy Hub:

<https://registertovote.london/>.

Qeexitaannada barnaamijka ka-qaybgalka muwaadiniinta iyo dimuqraadiyaddu waa:

- Ka-qaybgalka muwaadiniinta = awoodda qofku u leeyahay inuu ka qaybqaato nololasha bulsho iyo arrimaha muwaadiniinta, tusaale ahaan: bilaabidda ama saxiixidda codsiyo dadweyne (petitions), ka qaybgalka mudaaharaadyo nabadeed oo sharci ah, abaabul bulsho iskaa wax u qabso ah (tabarucad), iwm.
- Ka-qaybgalka dimuqraadiyadeed = awoodda qofku uu uleeyahay inuu ka qaybqaato hannaanka dimuqraadiyadda, tusaale ahaan: isu-taagidda xil doorasho, isu diiwaangelinta codbixinta iyo codaynta (haddii uu u qalmo), iyo ka-qaybgalka doodaha dadweynaha iyo dimuqraadiyadda tooska ah (sida shirarka dadweynaha/citizens assemblies), iwm.

Waa maxay London Voter Registration Week (LVRW)?

London Voter Registration Week (LVRW) waa mashruuc sanadle ah, oo aan la xidhiidhin xisbi siyaasi ah ama doorasho gaar ah, waxaana qabanqaabiya Greater London Authority (GLA) iyadoo lala kaashanayo hawl-fuliyayaal iyo ururka istiraatiijiyadeed ee diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha London, iyo weliba taageerayaal badan oo kala duwan. Waxa uu badanaa dhacaa bisha Sebtembar sanad kasta, waxaana ujeedkiisu yahay in lagu wacyigeliyo lana dhiirrigeliyo dadka London ku nool gaar ahaan kuwa aan si buuxda u diiwaangashanayn ama aan haysan matalaad inay isdiwaangeliyaan oo ay helaan xuquuqdooda dimuqraadiyadeed.

Waa maxay London Democracy Week (Toddobaadka Dimuqraadiyadda London)?

London Democracy Week (LDW) waa mashruuc sanadle ah oo madax-bannaan, aan la xiriihin xisbi siyaasadeed, waxaana fuliya Greater London Authority (GLA) iyadoo la shaqeynaya hawl-fuliyayaal bulsho. Markii ugu horreysay waxa uu dhacay bishii Maarso 2025. Ujeeddadiisu waa in lagu wacyigeliyo dadka London gaar ahaan kuwa aan si buuxda u diiwaangashanayn ama aan haysan matalaad si ay u fahmaan xuquuqdooda muwaadinimo iyo dimuqraadiyadeed, isla markaana la isu keeno dhammaan dadka danaynaya horumarka dimuqraadiyadda London.

Muxuu ahaa ololahii wacyigelinta ee Voter ID (Aqoonsiga Cod-bixiyaha)?

Sharciga Doorashooyinka (Elections Act 2022) wuxuu keenay isbeddello ku saabsan sida cod loo dhiiban karo iyo cidda u qalanta inay codeeyso. GLA oo ay weheliyaan ururo badan oo bulsho rayid ah, hay'ado waxbarasho, iyo dhammaan adeegyada doorashada degmooyinka London, ayaa iska kaashaday ololahan wacyigelinta dadweynaha ee madax-bannaan. Ololuhu wuxuu wargeliyay dadka London u qalma inay codeeyaan gaar ahaan kuwa aan si buuxda u diiwaangashanayn ama aan haysan matalaad, isbeddelladaas cusub ee aan horay loo arag waxaa ka mida:

- Soo bandhigista sharciga cusub ee waajibinaya aqoonsi sawir leh si qofku cod uga dhiibto doorashooyinka Baarlamaanka/Guud, doorashooyinka deegaanka/gobollada, iyo doorashooyinka Duqa London iyo Golaha London. doorashooyinka Duqa London iyo Golaha London.
- Isbeddello lagu sameeyay xuquuqda codbixinta ee qaar ka mid ah dadka Yurub (EU) ee ku nool London.
- Isbeddello ku yimid habka codsiyada codbixinta boostada iyo u wakiilashadacodbixinta (proxy voting).

Waxaad weli ka heli kartaa ilaha la xiriira arrintan website-ka:

www.registertovote.london/our-work/voter-id-campaign.

Maxaan u samaynaynaa sidan / Sidee ayay u saameeyeen dadka London?

Isbeddellada lagu sameeyay xuquuqda dimuqraadiyadeed ee lagu soo rogay Sharciga Doorashooyinka (2022) waxay caqabad weyn ku yihiin dadka horeyba aan si fiican uga qeybqaadan nidaamka cod-bixinta kuwaasoo intooda badan si gaar ah ay u saameeyeen dhibaatooyinkii COVID-19 iyo sicir-bararka ka dhashay qiimaha nolosha oo sare u kacay.

London waxa ay hore u ahayd meesha ugu heerka hooseeya ee dadku isdiwaangeliyaan guud ahaan gobollada iyo qaramada UK. Si aad wax dheeraad uga ogaato halkan booqo:

<https://data.london.gov.uk/dataset/survey-of-londoners-2021-22>.

Cadaymo ay keeneen Joseph Rowntree Foundation (Febraayo 2022), Trust for London iyo the3million ("London Voices: The Journey to Full Participation", Diseembar 2021), iyo sidoo kale xog ururin ay sameeyeen GLA (intii u dhaxaysay Agoosto 2022 ilaa Janaayo 2025) waxay tilmaamayaan kooxaha dadka aadka u badan ee aan haysan aqoonsiga sawirka leh ee la aqbalayo si ay u codeeyaan. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- Dhalinyarada London (da'doodu u dhaxayso 18–25)
- Dadka Madow, Aasiya, dadka laga tirada badan yahay, iyo muhaajiriinta London, oo ay ku jiraan dadka EU-da
- Dadka maqalka la' ama naafada ah
- Dadka waayeelka ah
- Dadka LGBTQIA+, gaar ahaan kuwa trans iyo non-binary ah
- Dadka dakhligoodu hooseeyo
- Dadka degan guryaha kirada ah (guryaha bulshada iyo kuwa gaarka loo leeyahay), iyo dadka ku jira xaaladaha nololeed oo aan degganayn, oo ay ku jiraan dadka hoy la'aanta ah

Isdiwaangelinta si loo codeeyo

Yaa iska diiwaangelin kara oo codeyn kara London?

Waxaad isdiwaangelin kartaa si aad u codeyso haddii aad degan tahay London (oo aad si caadi ah halkaas ugu nooshahay) isla markaana aad tahay 16 sano jir ama ka weyn. Laakiin waxaad kaliya codeyn kartaa marka aad gaarto da'da 18.

Wagtigan xadirka ah, muwaadiniinta British-ka ah, Irish-ka ah, kuwa u qalma ee ka tirsan Commonwealth-ka, iyo muwaadiniinta Midowga Yurub (EU) ee leh xuquuqda codbixinta ee la sii hayay, kuwaasoo ku nool London, way isdiwaangelin karaan waxayna dhiiban karaan codkooda.

Iyadoo la raacayo [British Nationality \(Eswatini, Gabon and Togo\) Order 2023](#), oo beddelay British Nationality Act una dhaqan galay si xooga 15 Diseembar 2023, muwaadiniinta Togo iyo Gabon hadda waa ay isdiwaangeli karaan oo codeyn karaan iyagoo loo aqoonsan yahay in ay yihiin muwaadiniin ka tirsan Commonwealth-ka kuwa u qalma.

Muwaadiniinta British-ka ee ku nool dibadda, kuwaas oo hore ugu noolaa ama hore uga diiwaangashanaa London, waxay xaq u leeyihiin inay iska diiwaangeliyaan oo ay codeeyaan doorashooyinka Baarlamaanka UK, iyagoo adeegsanaya ciwaankii ugu dambeeyay ee ay ka degganaayeen London.

Waxaad ka xaqiijin kartaa u-qalmidaada halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/which-elections-can-i-vote>.

Ma awoodaan dadka EU-da ee London jooga wali ma isdiwaangelin karaan oo ma codeyn karaan?

Haa, haddii aad tahay muwaadin Yurub u dhashay (EU) ah oo u qalma, ama aad leedahay xuquuqda cod-bixinta ee la haystay (retained voting rights), kana weyn tahay 16 sano oo degantahay London, waad is diiwaangelin kartaa si aad uga codeyso London.

Muwaadiniinta EU-da ee u qalma iyo kuwa haysta xuquuqda cod-bixinta (oo da'doodu ka wayn tahay 18 sano) waxay codeyn karaan doorashooyinka maxalliga ah sida doorashooyinka Golaha Degmooyinka London iyo doorashada Duqa Magaalada London / Golaha deegaanka London.

Muwaadiniint u dhashay Midowga Yurub ee kasoo jeeda waddamada: Denmark, Luxembourg, Poland, Portugal, ama Spain, kana heysta ogolaansho inuu galo ama ku noolaado UK, Channel Islands ama Isle of Man ama aan u baahnayn ogolaansho.

Muwaadinka reer Midowga Yurub (EU) ah ee leh xuquuqda codbixinta ee la sii haystay waa muwaadink ka yimid waddan kale oo ka tirsan EU-da, kaas oo lahaa ogolaansho uu ku gali karo ama ku joogi karo UK, Jasiiradaha Channel, ama Isle of Man ka hor ama 31-ka December 2020, ama aan u baahnay wax ogolaansho ah taasina ay si isdaba joog ah u socotay ilaa hadda iyadoo aan la joojin.

Ogolaanshaha gelitaanka ama joogitaanka UK, Channel Islands ama Isle of Man " (Leave to Enter or Remain) waxaa loola jeedaa xaalad sharciyeed oo socdaal/immigration ah.

Waxaad ka ogaan kartaa u-qalmidaada iyo noocyada doorashooyinka aad ka qayb qaadan karto halkan:

www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/other-registration-options/voting-if-youre-eu-citizen-living-uk.

Ma inaan 18 sano jir ahaado ayaa khasaba si aan isku diiwaangeliyo oo aan u codeyo?

Maya, waa faham khaldan oo dad badan haysta. London iyo guud ahaan England, waxaad isdiwaangelin kartaa marka aad gaarto 16 sano, laakiin kaliya waad codeyn kartaa marka aad gaarto da'da 18.

Haddii aanan lahayn ciwaan rasmi ah, ma isdiwaangelin karaa?

Haa, waad isdiwaangelin kartaa. Dad badan ma laha ciwaan rasmi ah ama joogto ah qaarkoodna xitaa guri maleh (hoy la'aan). Si kastaba, waad isdiwaangelin kartaa adigoo sheegaya meesha aad inta badan joogto ama aad la

leedahay xidhiidhka ugu dhow ee bulsho, adigoo buuxinaya foom gaar ah oo loogu talagalay xaaladdan.- Waxaadna ka heli kartaa foomkaasi halkan:

<https://www.gov.uk/government/publications/register-to-vote-if-you-havent-got-a-fixed-or-permanent-address>.

Ma iska diiwaangeli karaa si aan u codeeyo haddii aan dibadda wadanka ku noolyahay?

Muwaadiniinta British-ka ee ku nool dibadda, kuwaas oo hore ugu noolaa ama hore uga diiwaangashanaa London, waxay xaq u leeyihiin inay iska diiwaangeliyaan oo ay codeeyaan doorashooyinka Baarlamaanka UK, iyagoo adeegsanaya ciwaankii ugu dambeeyay ee ay ka degganaayeen London.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa halkan: <https://www.gov.uk/register-to-vote>.

Adeegyada doorashadu waxay xaqiijin doonaan aqoonsiga codsadhaha waxayna hubin doonaan in uu horay uga diiwaangashanaa ama u deganaa ciwaanka London ee la sheegay.

Haddii aad tahay qof isdiiwaangeliyay oo cod-bixiye ah oo ku nool dibadda, waxaad u codeyn kartaa adigoo jooga London maalinta doorashada, ama waxaad codsan kartaa inaad ku codeyso boosto ama adigoo qof wakiil ka dhiganaya (proxy) si uu kuugu codeeyo. Diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha ku nool dibadda waa in dib loo cusbooneysiyo muddo 3 sano gudahood ah.

Waxaad macluumaad dheeri ah ka heli kartaa halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/other-registration-options/voting-if-you-live-overseas>.

Ma u baahanahay in aan bixiyo caddeynta aqoonsigayga si aan isaga diiwaangeliyo cod-bixinta?

Dhammaan codsiyada cusub ee isdiiwaangelinta codbixinta waxaa la isbarbardhigaa (la hubiyaa) iyada oo loo eegayo diiwaannada dowladda dhexe. Haddii aan la helin wax is-waafajin ah (macluumaadkaaga aan laga helin diiwaannadaas), waxaa lagu soo diri doonaa codsi ah in aad keento "Caddeyn Aqoonsi". Waa in aad si degdeg ah uga jawaabta codsigaas, haddii kale codsigaaga waa la diidi karaa.

Caddeynta aqoonsiga waxaa lagugu weydiin karaa inaad ku soo gudbisoo online ama daabacan oo aad u dirto xafiiska adeegyada doorashada ee degmadaada. ama waxaad u baahan tahay in aad bixiso::

- Hal "Dukumeenti Aqoonsi Muhiim ah", ama
- One Hal "Dukumeenti Dowladdeed oo la Aamini karo" + laba "Dukumeenti Taariikh Maaliyadeed/Socdaal Nololeed", ama
- Afar "Dukumeenti Taariikh Maaliyadeed/Socdaal Nololeed"

Dukumeentiyada Aqoonsiga ee Aasaasiga ah (Primary identification documents)	
Dukumeenti	Faallooyin
Baasaboorka	Baasaboorka kasta oo weli ansax ah aan dhicin
Kaadhka deganaanshaha biyoomeetarka (Biometric Residence Permit)	Kaliya kuwa UK bixisay
Kaadhka aqoonsiga EEA	Waa in uu weli ansax yahay oo uusan dhicin
Kaadhka sawirka ee laysanka darawalnimada ee hadda jira	UK / Isle of Man / Jasiiradaha Channel (mid buuxa ama ku-meelgaar ah)
Kaarka Aqoonsiga Doorashada ee Waqooyiga Ireland (Northern Ireland)	

Dukumeentiyada Dowladda ee Lagu Kalsoon Yahay (Trusted government documents)

Dukumeenti	Faallooyin
Nooca warqadda ah ee duugga ah ee laysanka darawalnimada	Kaliya UK
Kaarka sawirka ee laysanka darawalnimada ee hadda jira	Wadamada aan ahayn UK ama Crown Dependencies
Shahaadada dhalashada	UK iyo Crown Dependencies oo keliya
Shahaadada guurka ama midda xiriirka sharciga ah (Civil Partnership)	UK iyo Crown Dependencies oo keliya
Shahaadada korsashada (Adoption Certificate)	UK iyo Crown Dependencies oo keliya
Ruqsadda hubka (Firearms Licence)	UK iyo Crown Dependencies oo keliya
Warqadda dammaanadda booliska (Police Bail Sheet)	UK iyo Crown Dependencies oo keliya

Dukumeentiyada Dhaqaale iyo Taariikhda Bulshada (Financial and social history documents)		
Dukumeenti	Faallooyin	Taariikhda la bixiyay & ansaxnimada
Warqadda daynta guryaha (Mortgage statement)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	Oo la bixiyay 12kii bilood ee la soo dhaafay
Warqadda bangiga ama urur dhisme (Bank/Building Society Statement)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	Oo la bixiyay 3dii bilood ee la soo dhaafay
Warqadda xaqiijinta furitaanka xisaabta bangiga	UK iyo Crown Dependencies	Oo la bixiyay 3dii bilood ee la soo dhaafay
Warqadda xisaabta kaarka deynta (Credit Card Statement)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	Oo la bixiyay 3dii bilood ee la soo dhaafay
Warqadda maaliyadeed (tusaale, hawlgab ama keydka endowment)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	Oo la bixiyay 12kii bilood ee la soo dhaafay
Warqadda canshuurta degmada (Council Tax Statement)	UK iyo Crown Dependencies	Oo la bixiyay 12kii bilood ee la soo dhaafay
Warqadda adeega (Utility bill – aan ahayn biilka telefoonka gacanta)	UK iyo Crown Dependencies	Oo la bixiyay 3dii bilood ee la soo dhaafay
Foomka P45 ama P60	UK, Crown Dependencies, ama EEA	Oo la bixiyay 12kii bilood ee la soo dhaafay
Warqadda faa'iidada (tusaale, child benefit, pension)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	Oo la bixiyay 3dii bilood ee la soo dhaafay
Warqad ka timid hay'adda dowladda dhexe ama deegaanka dawlada hoose (sida DWP, Jobcentre Plus, HMRC)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	Oo la bixiyay 3dii bilood ee la soo dhaafay

Ma haysto lambarka Caymiska Qaranka (National Insurance). Ma is diiwaangelin karaa si aan u codeeyo?

Haa, wali waxaad ka codsan kartaa adigoo maraya mareegta isdiwaangelinta cod-bixiyaha ee internet-ka. Laakiin waa sheegtaa faahfaahinta meesha lagaala soo xidhiidhaya. Kadib, adeegyada doorashada ee golaha deegaankaaga ayaa kula soo xiriiri doona si ay si kale u xaqiijiyaan aqoonsigaaga, si loo dhameystiro nidaamka. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in lagaa codsado shahaadada dhalashada, biilasha adeegyada korontada ama warqadaha bankiga (Bank statements). Taas macnaheedu waa, wali waad isdiwaangeli kartaa xitaa haddii aadan gacanta ku haysanin lambarkaaga Caymiska Qaranka.

Sideen isku diiwaangeliyaa si aan u codeeyo?

Si aad isugu diiwaangeliso cod-bixinta, waxaad geli kartaa: www.gov.uk/register-to-vote Kadibna buuxi foomka online-ka ah. Waxay qaadanaysaa dhowr daqiiqo oo keliya. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay waa lambarkaaga National Insurance (NI). Lambarkan waxaa loo adeegsadaa habka isdiiwaangelinta si , si gaar ah laguugu aqoonsado waa habka ugu fudud uguna dhaqsaha badan ee lagu xaqiijiyo cidda aad tahay. Laakiin ha welwelin haddii aadan haysan ama aadan garanaynin lambarkaaga NI waxaad kaliya galisaa faahfaahinta meesha lagaala soo xidhiidhayo inta lagu jiro foomka online-ka, kadibna adeegayaasha doorashada ee deegaankaaga ayaa kula soo xiriiri doona.

Ma jiraa waqti kama dambeys ah oo ah isdiiwaangelinta si aad cod-udhiibato?

Waad isdiiwaangelin kartaa wakhti kasta. Si kastaba ha ahaatee , codsigaaga lama lagama hawlgalayo isla markiiba mar walba, markaa waxaa fiican inaad isu diiwaangeliso sida ugu dhaqsaha badan haddii doorasho soo socoto. Taariikhda saxda ah ee kama dambeyska isdiiwaangelinta cod-bixinta doorasho kasta waa mid si gaar ah loo shaacin doonaa, laakiin badanaa waxay dhacdaa ilaa laba toddobaad kahor maalinta doorashada.

Markaan isdiiwaangeliyo, ma iska diiwaangashanahay weligeey?

Maya. Waa inaad mar kale isdiiwaangelisaa haddii aad bedesho ciwaankaaga, magacaaga sharciga ah, ama jinsiyaddaada. Dadka haysta laba jinsiyadood waa in ay mar kale isdiiwaangeliyaan marka ay qaataan jinsiyadda British-ka sababtoo ah taas waxay siinaysaa xuquuqda cod-bixinta oo taam ah.

Haddii aan isdiiwaangeliyo si aan u codeeyo, ma khasab baa in aan codeeyo?

Maya. Inaad codeeyso UK kama aha waajib qasab ah. Marka haddii aad isdiiwaangelisay, waxaad haysataa ikhtiyaarka inaad codeeyso ama aadan codeyn. Laakiin haddii aadan isdiiwaangelin, ma awoodid inaad codeeyso.

Hababka cod-bixinta

Doorasho nooc ee ah ayaan codeyn karaa?

Haddii aad tahay muwaadin British ah, Irish ah ama muwaadin ka tirsan Commonwealth-ka oo u qalma, kana weyn tahay 18 sano, isla markaana degan London waxaad codeyn kartaa dhammaan noocyada doorashooyinka, oo ay ku jiraan Doorashada guud ee UK (Baarlamaanka) iyo aftiyada dadweynaha , Doorashooyinka maxalliga ah ee London (degmooyinka/boroughs) , Doorashada Duqa Magaalada London iyo Golaha Deegaanka London.

Haddii aad tahay muwaadin Midowga Yurub (EU) ah oo u qalma, ama aad leedahay xuquuqda cod-bixinta ee la haystay, da' daaduna ka weyn tahay 18 sano, oo aad degantahay London markaas waxaad kaliya codeyn kartaa doorashooyinka maxalliga ah, sida Doorashada Golaha Degmooyinka London, Doorashada Duqa Magaalada London iyo Golaha Deegaanka London.

Muwaadin EU ah ee u qalma waa Muwaadin kasoo jeeda: Denmark, Luxembourg, Poland, Portugal, ama Spain, kana heysta ogolaansho inuu galo ama joogo UK, Channel Islands ama Isle of Man ama aan u baahnayn ogolaansho.

Muwaadin midowga yurub EU ah oo leh xuquuqda cod-bixinta ee la haystay Waa Muwaadin kale oo ka tirsan EU, kaas oo kahor ama ku beegan 31 Diseembar 2020 lahaa ogolaansho inuu galo ama joogo UK, Channel Islands ama Isle of Man ama aan u baahnayn ogolaansho isla markaana tan iyo waqtigaas si aan kala go' lahayn u joogay.

Ogolaanshaha gelitaanka ama joogitaanka UK (Leave to Enter or Remain) waxaa loola jeedaa xaalad sharciyeed (immigration) oo rasmi ah.

Wixii macluumaad cusub ah, eeg: <https://www.electoralcommission.org.uk/>.

Waa maxay hababka kala duwan ee cod-bixinta?

Markaad isdiwaangeliso, waxaad u codeyn kartaa mid ka mid ah saddex hab:

- Si toos ah: adigoo tagaya saldhigga cod-bixinta maalinta doorashada
- Cod-bixin boosto: haddii aadan meesha joogi doonin maalinta doorashada tusaale ahaan haddii aad safar ku maqan tahay
- Cod-bixinta u wakiilashada (proxy): adigoo qof kale oo aad ku kalsoon tahay u ogolaanaya inuu kuu codeeyo tusaale ahaan haddii aad xanuunsan tahay

Waxaad ka codsan kartaa cod-bixinta u wakiilashada (proxy) online halkan: <https://www.gov.uk/apply-proxy-vote>.

Waxaad codsan kartaa cod-bixin boostadda online halkan: <https://www.gov.uk/apply-postal-vote>.

Haddii aadan awoodin in aad onlineka ka codsato, waxaad soo dejisan kartaa oo buuxin kartaa foomka codsiga codbixinta wakiil (proxy vote) adigoo booqanaya: <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> Ama waxaad soo dejisan kartaa foomka codsiga codbixinta boostada (postal vote) adigoo booqanaya: <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> Kadib, waxaad foomka u diri kartaa xafiiska diiwaangelinta codbixiyeyaasha ee degmadaada, ama waxaad codsan kartaa in foomka lagu soo diro boosto ahaan.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta adeegga doorashooyinka degmadaada boggan: <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Ma u baahanahay aqoonsi sawir leh (photo ID) dhammaan hababka cod-bixinta?

Maya, ma aha inaad soo keento aqoonsi sawir leh marka aad codka dhiibanayso ku sameyneyso boosto ama aad qof wakiil ah u dirsanayso (proxy).

Hase yeeshee, qofka wakiilka kuu ah wuxuu u baahan doonaa inuu keeno aqoonsigiisa sawirka leh marka uu ka codeynayo saldhigga cod-bixinta. Haddii aad adigu si toos ah ugu codeyneyso saldhigga cod-bixinta, waxaad u baahan tahay aqoonsi sawir leh oo la aqbalo si aad u codeyso.

Si aad u codsato cod-bixin wakiil ah (proxy) ama boosto, waxaad codsan kartaa online: <https://www.gov.uk/apply-proxy-vote> ama <https://www.gov.uk/apply-postal-vote>.

Haddii aadan awoodin inaad online ku codsato, waxaad kala soo degi kartaa foomka codsiga, buuxin kartaa, kadibna u diri: Foomka cod-bixinta wakiilka: <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> ama Foomka cod-bixinta boostada: <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> Kadibna u diri xafiiska Diiwaangelinta Cod-bixinta ee degmadaada, ama waxaad weydiisan kartaa in foomka laguugu soo diro boost.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xafiiskaaga degmada halkan: <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Cod-bixinta qof ahaan ama Meesha la tegayo (in person)

Xaggee ka heli karaa saldhigga cod-bixinta (polling station)?

Haddii aad u diiwaangashan tahay si aad ugu codeyso si toos ah si qof ahaan ah, kaarkaaga cod-bixinta ayaa laguugu soo diri doonaa ciwaankaaga aad ku diiwaangashatay ka hor maalinta doorashada. Kaarkaas waxaa ku qornaan doona cinwaanka saldhigga cod-bixinta ee lagu asteeyay waxaad kaliya ka codeyn kartaa saldhiggaas, waxaana inta badan uu ahaan doonaa xarun dadweyne sida dugsi, xarun diimeed ama xarun bulshada ah.

Saldhigga cod-bixinta wuxuu furnaan doonaa 7 subaxnimo ilaa 10 habeenimo maalinta doorashada.. Ha walwalin haddii aad lumiso kaarka cod-bixinta uma baahnid si aad u codeyso (haddii aadan si qarsoodi ah isku diiwaangelin).

Waxaad ka heli kartaa saldhiggaaga cod-bixinta adigoo gelinaya postcode-gaaga halkan:
<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Maxaa ka dhacaya saldhigga cod-bixinta?

Dhammaan saldhigyada cod-bixintu waxay furnaanayaan laga bilaabo 7:00 subaxnimo ilaa 10:00 habeenimo maalinta doorashada.. Saldhigyo badan waxay yeelan karaan dad soo dhoweeya cod-bixiyayaasha ka hor inta aysan gudaha galin, kuwaas oo weydiin doona haddii aad wato [aqoonsi sawir leh oo la aqbalay](#), si aad u codeyso qof ahaan.

Markaad gudaha u gasho saldhigga cod-bixinta, waxaad filan kartaa waxyaabahan soo socda:

- Shaqaale saldhigga ah ayaa ku weydiin doona magacaaga iyo ciwaankaaga, si ay u xaqiijiyaan inaad ku qoran tahay diiwaanka cod-bixiyayaasha.
- Waxay ku weydiin doonaan aqoonsigaaga sawirka leh, waxayna hubin doonaan in uu yahay midki la aqbalayay (macluumaad dheeri ah ka fiiri: <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id/accepted-forms-photo-id>), iyo in sawirka aqoonsigu in uu kaaga yahay Haddii aad si qarsoodi ah isku diiwaangelisay (macluumaad dheeraad ah ka fiiri: <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/register-vote/register-vote-anonymously>), waxaa lagaa codsan doonaa kaarka cod-bixinta iyo Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon (Anonymous Elector's Document - AED). Waxaa jiri doona meel gaar ah oo khaas ah haddii aad rabto in aqoonsigaaga sawirka leh lagu arko meel gaar ah — taas oo noqon karta qol gooni ah ama meel shaashada asturaadu ay ku xidhantahay.
- Marka si guul leh loo hubiyo aqoonsigaaga, shaqaalaha saldhigga ayaa magacaaga ka saari doona diiwaanka, kadibna waxay ku siin doonaan warqad cod-bixin oo ay ku qorantahay magacyada musharrixiinta aad dooran karto. Waxaa laga yaabaa in lagu dhiibo in ka badan hal warqad cod-bixin haddii ay jiraan dhowr doorasho oo ka dhacaya deegaankaaga isla maalintaas.
- Qaado warqaddaha cod-bixinta kuna tag qolka cod-bixinta si aad si qarsoodi ah ugu codeyso. Si taxaddar leh u akhri tilmaamaha ku qoran warqadda cod-bixinta. Doorashooyinka qaar waxay isticmaalaan habab kala duwan oo cod-bixin ah, markaa waa muhiim inaad si sax ah u buuxiso warqad kasta.
- Warqaddaada cod-bixinta ku buuxi adigoo isticmaalaya qalin laga helayo gudaha qolka cod-bixinta. Haddii aad rabto, waxaad isticmaali kartaa qalinkaaga gaarka ah. Ha ku qorin wax kale warqadda, haddii kale codkaaga lama tirin doono. Haddii aad khalad gasho, ha dhigin warqadda codka sanduuqa cod-bixinta. Weydii shaqaalaha saldhigga warqad cusub oo beddel ah, kadibna mar kale buuxi.
- Markaad dhamayso, laablaab warqadda cod-bixinta ee aad buuxisay oo dhig sanduuqa codka.

Aqoonsiga Cod-bixiyaha ee Sawirka leh (Photo Voter ID)

Wali miyaan u baahanahay in aan isdiwaangeliyo xitaa haddii aan leeyahay aqoonsi sawir leh si aan u codeeyo?

Haa. Isdiwaangelinta cod-bixinta waa tallaabada ugu horreysa ee lagu gaari karo xuquuqdaada dimuqraadiyadeed. Waa in aad xili hore isu diyaarisaa isdiwaangalisaa ka hor maalinta doorashada. Marka fadlan, qorshee ka hor.

Noocee aqoonsiyada sawirka leh ayaa la aqbalayaa si qof ahaan loogu codeeyo?

Ma aha in la aqbalo aqoonsi kasta. Dadka London ku nool waxay u baahnaan doonaan in ay haystaan oo ay muujiyaan mid ka mid ah aqoonsiyada hoos ku qoran, kuwaas oo sharcigu si rasmi ah u aqoonsan yahay in ay yihiin caddeynta aqoonsiga ee lagu codeyn karo:

- Baasaboorka UK ah
- Baasaboorka bixiyay waddan ka tirsan European Economic Area (EEA) ama waddan ka tirsan Commonwealth
- Kaarka Aqoonsiga Qaranka ee waddamada EEA ah

- Ruqsadda Darawalnimada UK (oo leh sawir, ruqsadaha warqadda ah lama aqbalayo)
- Ruqsadda Darawalnimada ee Channel Islands, Isle of Man, ama waddan EEA ah
- Dukumeenti socdaal oo biometric (Faraha iyo indhaha layska qaado) ah (oo ay ku jiraan eVisas)
- Kaarka Aqoonsiga ee leh calaamadda PASS (Proof of Age Standards Scheme)
- Ministry of Defence Form 90 (Kaarka Aqoonsiga wasaaradab Difaaca) ama Ministry of Defence Form 100 (Kaarka Halyeeyga Ciidamada)
- Kaarka Baska ee Waayeelka, Kaarka Baska ee Naafada, Kaarka Oyster 60+, ama Freedom Pass
- Kaarka Blue Badge
- [Shahaadada Voter Authority Certificate oo bilaash ah](#)

Fiirro gaar ah: waa in aad keentaa **asalka (originalka)** aqoonsiga sawirka leh marka aad tagayso saldhigga cod-bixinta. Sawirro laga qaaday aqoonsiga oo ku jira telefoonkaaga ama koobiyo (photocopies) lama aqbali doono

Waxaa lagu oggolaan doonaa in aad isticmaasho aqoonsi dhacay haddii sawirka wali si cad lagugu aqoonsan karo. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan noocyada aqoonsiyada la aqbalayo waxaad ka heli kartaa website-ka Guddiga Doorashooyinka (Electoral Commission):

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id>.

Haddii aqoonsiga aad haysato uusan ka mid ahayn liiskan, ahayna mid uu bixiyay hay'ad dowladeed, laguuma aqbali doono inuu yahay caddeyn aqoonsi sax ah si aad u codeeyso.

Waa maxay eVisa, sideese ayaan ugu codeyn karaa qof ahaan?

eVisa waa diwaan online ah oo muujinaya xaaladdaada socdaalka iyo shuruudaha oggolaanshahaaga inaad gasho ama joogto UK.

Haddii aad doorato inaad si toos ah ugu codeeyso saldhigga cod-bixinta, waxaad u baahan doontaa inaad gasho akoonkaaga eVisa oo aad muujiso eVisa-gaaga adigoo isticmaalaya telefoonkaaga gacanta ama qalab kale oo dijitaal ah. Laga bilaabo 1 May 2025, eVisas waxaa loo aqoonsan doonaa aqoonsi sawir leh oo la aqbalayo si loogu codeeyo.

eVisa waxa uu horay ugu jiray liiska sharciyeed ee aqoonsiyada la aqbalo, maadaama uu yahay dukumeenti socdaal biometric ah. Sidaa darteed, adeegyada doorashada lama waajibin karo in ay wax ka beddelaan kaararka cod-bixinta ama ogaysiisyada saldhigyada cod-bixinta si ay si gaar ah u xusaan eVisa.

Sideen ku codsan karaa aqoonsi sawir leh oo la aqbalo si aan u codeeyo?

Waxaad codsan kartaa, cusbooneysiin kartaa ama beddeli kartaa ruqsadda darawalnimada (driving licence), sidoo kale ka eeg ama la wadaagi ruqsaddaada addigoo booqanaya halkan:

<https://www.gov.uk/browse/driving/driving-licences>.

Waxaad online uga codsan kartaa baasaboorka British ah halkan: <https://www.gov.uk/apply-renew-passport>. Sidoo kale, waxaad foomamka codsiga baasaboorka ka heli kartaa xafiiska boostada ee deegaankaaga (eeg laanta kugu dhow: <https://www.postoffice.co.uk/branch-finder>) waxaana sidoo kale codsan kartaa boosto ahaan ama adeegga "Check and Send" ee boostada (faahfaahin: <https://www.gov.uk/how-the-post-office-check-and-send-service-works>).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Kaarka Oyster 60+ London waxaad ka heli kartaa:

<https://tfl.gov.uk/fares/free-and-discounted-travel/60-plus-oyster-photocard>.

Waxaad codsan kartaa ama cusbooneysiin kartaa Blue Badge halkan: <https://www.gov.uk/apply-blue-badge>. Haddii aad su'aalo ka qabto Blue Badge-ka, la xiriir golaha deegaankaaga:

<https://www.gov.uk/blue-badge-scheme-information-council>.

Xafiiska Citizens Advice ee deegaankaaga ayaa laga yaabaa inuu kaa caawiyo. Hel xarunta kugu dhow halkan:

<https://www.citizensadvice.org.uk/>.

Sideen ku codsan karaa shahaadada Voter Authority Certificate ee bilaashka ah?

Haddii aadan haysan mid ka mid ah aqoonsiyada sawirka leh ee la aqbalayo si aad u codeyso, waxaad codsan kartaa Voter Authority Certificate oo bilaash ah. Shahaadadan waxa kaliya oo loo adeegsan karaa cod-bixinta looma adeegsan karo sidii aqoonsi guud, waxaana ay ansax ku tahay muddo 10 sano ah. Marka aad codsaneyso, waxaad u baahan doontaa: Sawir, Taariikhda dhalashada, Lambarkaaga National Insurance Haddii aadan haysan lambarka National Insurance ama aadan garanaynin, wali waad codsan kartaa. Dawlada hoose ayaa kula soo xiriiri doonta si ay caddeyn kale oo aqoonsi ah kuu weydiyaan.

Waxaad online uga codsan kartaa shahaadada Voter Authority Certificate halkan:

<https://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate>.

Ama waxaad ka buuxin kartaa foomka codsiga warqadda ah halkan:

https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment_data/file/1137587/VAC_public_facing.pdf Kadibna u dir dawlada hoose ee deegaankaaga. Waxaad codsan kartaa in foomka lagu siiyo daabacaad aad u weyn (Large Print), farta indhoolaha (Braille) ama Qaab Akhris Fudud (Easy Read).

Si aad ula xiriirto xafiiska deegaankaaga ee adeegyada doorashada, geli postcode-gaaga halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Sidee ayaa aqoonsigeyga sawirka leh loo hubin doonaa haddii aan xidho dabool wajiga ah (face covering) sababo diin darteed?

Si shaqaalaha saldhigga cod-bixintu u xaqiijiyaan in aad sawirka aqoonsiga leedahay, waxaa lagaa codsan doonaa in aad si kooban u qaaddo daboolka wajiga, si loo arko wejigaaga.

Waxaad markaa sii wadan kartaa inaad xirnaato daboolka inta kale ee habka cod-bixinta.

Haddii aad rabto, waad codsan kartaa in haweeney shaqaale ah ay kaa hubiso aqoonsiga. Shaqaalaha saldhigga waxay isku dayi doonaan inay tan kuu fududeeyaan haddii ay suurto gal tahay.

Sidoo kale, waxaad codsan kartaa in aqoonsigaaga lagugu hubiyo meel gaar ah. Waxaa jiri doona meel gaar ah oo khaas ah oo laguugu talagalay arrintan.

Codsiyada noocan ah waa in si xushmad leh oo qarsoodi ah loo maareeyaa. Lama waajibin karo in aad sheegto sababta codsigaaga, mana lagaa codsan karo sharaxaad. Waxaa jiri doona muraayad, si aad hubiso in daboolka wejigaagu si sax ah kuu saaran yahay ka hor intaadan ka bixin meesha gaarka ah.

Haddii aad diido in aad qaaddo daboolka wajiga oo shaqaaluhu ay awoodi waayaan inay xaqiijiyaan aqoonsigaaga, taasi waxay keeni kartaa inaan lagu soo saarin warqadda cod-bixinta taas oo micnaheedu yahay in aadan awoodin in aad codeyso.

Sidee ayaa aqoonsigeyga sawirka leh loo hubin doonaa haddii aan xirto maaskaro caafimaad darteed?

Si shaqaalaha saldhigga cod-bixintu u xaqiijiyaan in aad sawirkaaga la mid tahay, waxaa lagaa codsan doonaa in aad si kooban u qaaddo maaskarada wajiga, si loo arko wejigaaga. Sharcigan wuxuu khuseeyaa haddii aad tahay qof difaaciisa xasaasi yahay (immuno-suppressed) ama aad xidhato maaskaro sababo caafimaad darteed.

Waad codsan kartaa in aqoonsigaaga lagugu hubiyo meel gaar ah. Waxaa saldhigga cod-bixinta ka jiri doona meel gaar ah oo arrintan loogu talagalay. Codsiyadaas waa in si xushmad iyo asturnaan leh loo qaataa. Looma baahna in aad bixiso sabab, mana lagaa codsan karo in aad sharaxaad bixiso.

Haddii aad diido in aad qaaddo maaskarada oo shaqaaluhu aysan awoodin inay xaqiijiyaan aqoonsigaaga, waxaa dhici karta inaan lagu soo saarin warqadda cod-bixinta, taas oo keeni karta in aadan awoodin in aad codeyso.

Sidee bay shaqaalaha saldhigga cod-bixintu ku go'aaminayaan in sawirka ku yaalla aqoonsigeyga uu ii eg yahay?

Shaqaalaha saldhigga cod-bixinta waxay eegayaan sawirka ku yaalla aqoonsigaaga iyo magaca ku qoran, si ay u xaqiijiyaan inuu la mid yahay magacaaga ku qoran diiwaanka cod-bixiyeyaasha.

Haddii aadan hubin in sawirkaaga si fudud laguugu garan karo, waxaad codsan kartaa Voter Authority Certificate oo bilaash ah, adigoo wata sawir cusub oo kaaga ah.

Macluumaad dheeraad ah:

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id/applying-a-voter-authority-certificate>.

Haddii walaacaagu la xiriirayo muuqaalkaaga jinsiyadeed, ogow in Voter Authority Certificate uusan lahayn calaamad muujinaysa jinsi (gender marker).

Anigu waxaan ahay qof indhaha la' ama araga daciifka ah maxaa taageero ah oo saldhigga cod-bixinta la iigu diyaariyay?

Ka dib hirgelintii Sharciga Doorashooyinka (Elections Act 2022), masuuliyiinta doorashada ee loo yaqaan Returning Officers — kuwaasoo kormeeraya habsami u socodka doorashada — waxaa lagu waajibiyay in ay sameeyaan abaabul u oggolaanaya dadka naafada ah in ay si madax-bannaan oo qarsoodi ah u codeeyaan. Returning Officers waa in ay raacaan tilmaamaha u diyaarsan ee Guddiga Doorashooyinka (Electoral Commission) ee ku saabsan helitaanka cod-bixinta (accessibility).

Si si gaar ah loogu taageero dadka indhaha la' ama aragga daciifka ka ah, saldhig kasta oo cod-bixin ah waa in uu hayaa qalabkan soo socda:

- Qalab taabasho ah oo kuu sahlaya inaad si toos ah ugu codeyso
- Nuqul daabacan oo weyn (Large Print) oo ah warqadda cod-bixinta, si tixraac ah
- Weyneeyayaal (magnifiers)
- Iftiin dheeri ah
- Taageero ka timaadda shaqaalaha saldhigga, si ay kuu geeyaan qolka cod-bixinta ama ay kuu caawiyaan in aad calaamadiso codkaaga haddii loo baahdo

Returning Officers sidoo kale waxaa laga doonayaa in ay saadaaliyaan baahiyaha gaarka ah ee ka jiraya deegaanka, waxayna keeni karaan qalab dheeri ah, sida: Qalab cod ah (audio devices) oo kuu oggolaanaya inaad si madax-bannaan oo qarsoodi ah u codeyso. Ka akhriso xog dheeraad ah oo ku saabsan tilmaamaha Guddiga Doorashooyinka ee Returning Officers halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/guidance-returning-officers-assistance-voting-disabled-voters/ensuring-voting-accessible/providing-equipment-polling-station-enables-or-makes-voting-easier-disabled-voters>.

Sidee baan uga codsan karaa saldhigga cod-bixinta in la ii sameeyo wax-ka-beddel macquul ah (reasonable adjustment)?

Waxaad weydiin kartaa shaqaalaha saldhigga cod-bixinta isla maalinta doorashada, iyagaana ku caawin doona intii karaankooda ah. Si ay wax walba si habsami leh ugu dhacaan, waxaad hore u qori kartaa warqad ama farriin oo aad u dirto Returning Officer-ka deegaankaaga ama adeegyada doorashada ee degmada, si aad ugu sheegto in aad u baahan tahay wax-ka-beddel macquul ah si aad si madax-bannaan u codeyso. Si aad u hesho macluumaadka xiriirka, waxaad adeegsan kartaa qalabka raadinta postcode-ka ee Guddiga Doorashooyinka (Electoral Commission):

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a-voter/your-election-information>, Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa warqad-diyaarsan oo aad ka soo dejiisan karto RNIB si aad ula xiriirto:

https://www.rnib.org.uk/documents/1604/Notification_template_for_individuals_to_send_to_ReturningOfficers.docx.

Waxaa la siiyay tilmaamo shaqaalaha saldhigyada cod-bixinta si ay u fahmaan in la adeegsan karo barnaamijyada telefoonka gacanta (sida Seeing AI oo isticmaala caqliga gacan-ku-samayska ah si uu u akhriyo qoraalka), ama qalab

weynaynaya muuqaalka, si dadka indhaha la' ama aragga daciifka ah ay ugu codeeyaan si madax-bannaan — taasina waa wax-ka-beddel macquul ah.

Maxaan sameeyaa haddii aan la kulmo dhibaato saldhigga cod-bixinta?

Haddii aad la kulanto wax dhibaato ah saldhigga cod-bixinta ama aad rabto in aad bixiso faallo ku saabsan waayo-aragnimadaada, waxaad la xiriiri kartaa adeegyada doorashada ee degmadaada.- Si aad ula xiriirto, geli postcode-kaaga halkan: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Aqoonsiga Cod-bixiyaha ee Sawirka leh (Photo Voter ID)

Maxaa dhacaya haddii aan tago saldhigga cod-bixinta anigoo aan wadan aqoonsi sawir leh oo la aqbali karo?

Haddii aad tagto saldhigga cod-bixinta si aad u codeyso adigoo aan haysan aqoonsi sawir leh oo la aqbalayo, laguma siin doono warqadda cod-bixinta (ballot paper). Waxaad u baahan doontaa inaad dib u soo laabato adigoo wata mid ka mid ah aqoonsiyada la aqbalayo, si aad u hesho warqaddaada cod-bixinta.

Markaad soo laabato oo aad keento asalka (original) aqoonsiga sawirka leh ee la aqbalayo, waa in lagu oggolaadaa inaad codeyso.

Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in aan soo bandhigo aqoonsi sawir leh si aan u codeeyo?

Haddii aadan doorbideynin in aad muujiyo aqoonsi sawir leh saldhigga cod-bixinta, waxaad codsan kartaa cod-bixin boosto ah ama cod-bixin wakiil ah (proxy). Aqoonsi sawir leh laguma baahna si aad u codsato ama ugu codeyso boosto ahaan. Aqoonsi sawir leh sidoo kale laguma baahna marka aad codsaneyso cod-bixin wakiil ah, laakiin wakiilkaaga wuxuu u baahan doonaa inuu muujiyo aqoonsigiisa sawirka leh ee la aqbalayo marka uu ka codeynayo saldhigga cod-bixinta.

Waa maxay faahfaahinta laga hubinayo aqoonsiga sawirka leh?

Marka lagu hubinayo aqoonsigaaga sawirka leh saldhigga cod-bixinta, waxa la eegayaa In magaca ku qoran aqoonsigaaga uu la mid yahay magacaaga ku qoran diiwaanka cod-bixiyeyaasha. Shaqaaluhu ma eegi doonaan calaamadda jinsiyeed (gender marker), ciwaankaaga, ama jinsiyaddaada.

Magaca ku qoran diiwaanka cod-bixinta uma eka magaca ku qoran aqoonsigeyga maxaan sameeyaa?

Haddii magaca ku qoran diiwaanka cod-bixinta uusan la mid ahayn magaca ku qoran aqoonsigaaga sawirka leh, waxaad sameyn kartaa mid ka mid ah saddexdan:

- Keen dukumeenti rasmi ah oo muujinaya beddelka magaca tusaale ahaan, shahaadada guurka, oo uu weheliyo aqoonsigaaga sawirka leh
- Codso shahaadada Voter Authority Certificate oo bilaash ah adigoo adeegsanaya magaca aad isku diiwaangelisay iyo sawir cusub: <https://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate>.
- Ama la xiriir adeegyada doorashada ee deegaankaaga si aad u beddesho magacaaga ku qoran diiwaanka: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Ma codsan karaa in aqoonsigeyga sawirka leh lagu hubiyo meel gaar ah? Ma khasab baa in aan sharaxaad bixiyo sababta?

Haa. Waxaa saldhigga cod-bixinta ka jiri doona meel gaar ah oo loogu talagalay in lagu hubiyo aqoonsigaaga si asturan. Waxaad si fudud u codsan kartaa in aqoonsigaaga lagu hubiyo meel gaar ah. Codsiyada noocan ah waa in si xushmad iyo asturnaan leh loo wajahaa. Maya, looma baahna in aad bixiso sabab. Mana aha in lagaa codsado sharaxaad sababta aad u codsanayso meel gaar ah.

Waxaan ka walwalsanahay isticmaalka aqoonsi sawir leh oo leh calaamad jinsiyeed (gender marker) maxaan sameeyaa?

Magaca ku qoran aqoonsigaaga sawirka leh waa in uu la mid yahay magaca aad isugu diiwaangelisay cod-bixinta. Ma jirto baahi ah in aad muujiso aqoonsi leh calaamad jinsiyeed si aad u codeyso.

Haddii aadan haysan aqoonsi sawir leh, aad ka walwalsan tahay isticmaalka aqoonsigaaga jira oo leh calaamad jinsiyeed, ama aadan hubin in sawirka uu wali kuu eg yahay, waxaad codsan kartaa shahaadada Voter Authority Certificate oo bilaash ah halkan: <https://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate>. Shahaadadan ma laha calaamad jinsiyeed.

Maxaan sameeyaa haddii aqoonsigeyga sawirka leh uu lumo, la xado, baaba'o ama jeex-jeexmo ka hor maalinta doorashada?

Haddii aqoonsigaaga sawirka leh uu lumo, la xado, burburo ama jeex-jeexmo ka hor maalinta doorashada, kadib marka uu dhammaado wakhtiga lagu codsanayo Voter Authority Certificate, waxaad codsan kartaa cod-bixin deg-deg ah oo wakiil ah (emergency proxy vote) halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/ways-vote/apply-vote-proxy>.

Tani waxay khusaysaa xaalado deg-deg ah oo dhacda kaddib wakhtiga kama dambaysta ah ee codsiga cod-bixinta wakiilka caadiga ah. Foomkan waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa haddii Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon (Anonymous Elector's Document) uu lumo, la xado, burburo ama jeex-jeexmo.. Codsiyada noocan ah waxaa la samayn karaa illaa 5:00 galabnimo maalinta doorashada.

Goorma ayay bilaabatay shuruudda ah in la keeno aqoonsi sawir leh si loo codeeyo qof ahaan?

Shuruudda ah in aqoonsi sawir leh lagu codeeyo qof ahaan waxay bilaabatay doorashooyinka maxalliga ah ee England laga bilaabo May 2023. Markii ugu horreysay ee ay khusaysay doorashooyinka guud ee London waxay ahayd doorashadii Duqa Magaalada London iyo Golaha London Assembly(goalaha deegaanka) ee 2 May 2024. Shuruudda cod-bixinta ee Baarlamaanka UK (doorashooyinka guud) waxay dhaqan gashay doorasho kasta oo dhacday ka dib 5 October 2023, iyo sidoo kale doorashooyinkii baarlamaanka ee ku meel gaarka ahaa (by-elections) ka dib May 2023.

Waxaan ka welwalsanahay soo bandhigida aqoonsiga sawirka leh ee cod-bixinta yaan la hadli karaa?

GLA ma ahayn hay'adda keentay sharciga aqoonsiga sawirka leh ee cod-bixinta. GLA kaliya waxay leedahay awood ay ku wacyigeliso dadka reer London oo ay isku daydo in ay wax ka qabato saameynta la xiriirta sinaanta iyo helitaanka adeegga.

Haddii aad tahay hay'ad bulshada rayidka ah oo rabta in aad ka caawiso faafinta wacyigelinta iyo qeybinta agabka GLA si loo gaaro dad badan, waxaad la xiriiri kartaa kooxda GLA ee Ka-Qaybgalka Dimuqraadiyadda:

democracy@london.gov.uk.

Haddii aad rabto in aad cabasho ka dhiibato sharciga cusub ee aqoonsiga sawirka leh, waxaad u qori kartaa:

correspondence@communities.gov.uk Ama boosto ahaan: Ministry of Housing, Communities and Local Government, 2 Marsham Street, London, SW1P 4DF.

Maxaa loo aqbali waayay noocyada kale oo aqoonsiga ah?

Sharcigu wuxuu si cad u cayimayaa noocyada dukumeentiyada lagu aqbali karo aqoonsi sawir leh oo lagu codeeyo. Noocyadan waxaa go'aamiyay Dowladda UK.

Dowladda UK waxay sidoo kale bixisay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha iyo sababaha ay ku saleeyeen doorashada noocyada aqoonsiga. Waxaad ka akhrisan kartaa halkan:

<https://www.gov.uk/government/publications/voter-identification-at-polling-stations-and-the-new-voter-card/protecting-the-integrity-of-our-elections-voter-identification-at-polling-stations-and-the-new-voter-card>.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Shahaadada Voter Authority Certificate ee Bilaashka ah

Waa maxay macluumaadka lagu muujinayo shahaadada bilaashka ah ee Voter Authority Certificate?

Shahaadada bilaashka ah ee Voter Authority Certificate waxay muujin doontaa Magacaaga oo buuxa, Sawirkaaga, Magaca dawlada hoose ee bixisay, Aqoonsi gaar ah oo lambarro iyo xarfo iskugu jira (oo ay council-ku bixiso), Taariikhda la bixiyay shahaadada iyo Taariikhda lagu taliyay in dib loo cusbooneysiyo

Waa maxay shuruudaha sawirka ee codsiga Voter Authority Certificate?

Inta lagu jiro habka codsiga shahaadada Voter Authority Certificate, waxaad u baahan doontaa sawir cusub. Shuruudaha sawirka waxay la mid yihiin kuwa baasaboorka Waa in la arkaa madaxa iyo garbahaaga, Madaxa waa inuusan wax ka saarnayn haddii aanay ahayn dabool diimeed ama sababo caafimaad dartood Wajiga lama dabooli karo sabab kasta ha noqotee.

Qaabka sawirka

Sawirka waa inuu noqdaa mid uu leeyahay qofka codsanaya:

- Isagoo hore u jeeda oo si toos ah u eegaya kamaradda
- Isku day in la arko kaliya madaxa iyo garbaha, iyadoo madaxa aan wax kaa saarnayn, haddii aanay ahayn arrimo diin ama caafimaad
- Qof kale kama muuqan karo sawirka
- Muuqaal wejiga oo dabiici ah, indhahana waa in ay furanyihiin oo si cad loo arki karo Tusaale ahaan: ma xirnaayo muraayado madow ama timaha wejiga qarabaya

Fiiro gaar ah: Shuruudahan ma khuseeyaan haddii qofka naafada ah uusan awoodin inuu bixiyo sawir buuxinaya shuruudahaan.

Tayada sawirka

Sawirka codsaduho waa in uu:

- Noqdo sawir dhab ah (run ah oo aan la beddelin)
- Noqdo mid midab leh
- Lagu qaaday asalka (background) khafiif ah oo fidsan
- Noqdo mid si fiican u fiiqan (focus) oo cad
- Aan lahayn 'redeye' (indhahaaga oo iftiinka kamarradu ku dhacayo taas oo si fiican inaan loo arkin keenaysa), hoos ama hadh muuqda wajiga ama milicsi (reflection)
- Aan waxyeello gaarin (damaged)

Cabirka sawirka

Haddii codsigu yahay online, sawirka waa inuu ahaadaa::

- Ugu yaraan 750 pixels dherer iyo 600 pixels ballac
- Waa inuu ku jiro fayl elektaroonik ah oo aan ka weynayn 20MB

Haddii codsigu yahay waraaq ahaan (paper form), sawirku waa inuu ahaadaa::

- Ugu yaraan 45mm dherer iyo 35mm ballac
- Uuna ka weynaamin 297mm dherer ama 210mm ballac

Xaggee ayaan ka heli karaa taageero si aan u codsado Shahaadada Aqoonsiga Cod-bixiyaha (Voter Authority Certificate) oo bilaash ah?

Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan codsiga Shahaadada Aqoonsiga Cod-bixiyaha bilaashka ah, sida qaadashada sawirka codsiga ama haddii aad rabto in foom warqad ah lagu soo diro, waxaad la xiriiri kartaa kooxda adeega doorashooyinka ee golaha deegaankaaga.

Waxaad heli kartaa faahfaahinta xiriirka adiga oo gelinaya postcode-kaaga (lambarka xaafadda) boggan: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Macluumaad dheeri ah waxaad ka heli kartaa: <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id/applying-a-voter-authority-certificate>

Ma jiro waqti kama dambeys ah oo lagu codsado Shahaadada Aqoonsiga Cod-bixiyaha?

Haa, waxaad codsan kartaa Voter Authority Certificate ama Dukumiintiga Cod-bixiyaha Magaciisu Qarsoonyahay (Anonymous Elector's Document) wakhti kasta. Laakiin haddii aad doonayso in aad ka qayb qaadata doorasho gaar ah, codsiga waa in la gudbiyaa ugu dambayn 5 galabnimo, 6 maalmood oo shaqo ka hor maalinta codbixinta.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida codsigaaga loo qiimeyn doono, ka eeg tilmaamaha Komishinka Doorashooyinka: <https://www.electoralcommission.org.uk/running-electoral-registration-england/voter-authority-certificates-and-anonymous-electors-documents/deadlines-applications-voter-authority-certificates-or-anonymous-electors-documents-a-particular>.

Ma u isticmaali karaa Shahaadada Aqoonsiga Cod-bixiyaha meel kale oo aan ahayn doorasho?

Maya. Shahaadada Aqoonsiga Cod-bixiyaha waxaa loo isticmaalaa kaliya codbixinta, mana noqonayso aqoonsi rasmi ah ama ujeedooyin kale sida caddaynta da'da ama caddaynta ciwaanka.

Cod-bixinta Boostada iyo Wakiilka (Postal and Proxy Voting)

Maxaa isbeddel ah oo ku yimid codbixinta wakiilka (proxy voting)?

Isbeddello cusub ayaa dhaqan galay 31-kii October 2023:

Hadda waxaa jiro xadid ku saabsan inta qof ee hal qof ugu codeyn karo wakiil ahaan. Qof kasta wuxuu u codeyn karaa ugu badnaan laba (2) cod-bixiye UK-based ah, ama afar (4) cod-bixiye oo dibadda jooga (tusaale: muwaadiniinta British-ka ah ee qurbaha ku nool).

Qaar ka mid ah noocyada codsiyada wakiilka waxaad ka dalban kartaa online: <https://www.gov.uk/apply-proxy-vote>. Laakiin ma dalban kartid online haddii Codsigaagu u baahan yahay markhaati (sida dadka si qarsoodi ah isu diiwaangeliyay) Ama haddii aad codsanayso codbixin degdeg ah (emergency proxy vote).

Haddii aadan awoodin in aad online ku codsato, Waxaad soo dejisan kartaa oo buuxin kartaa foomka codsiga codbixinta wakiilka (proxy vote) adigoo booqanaya: <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> Kadibna waxaad foomkaas u diri kartaa Xafiiska Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha ee deegaankaaga, ama waxaad codsan kartaa in lagu soo diro boosto ahaan.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xafiiska deegaankaaga halkan: <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Ogow codsiyada online iyo kuwa warqadda ah labadaba waxay u baahan yihiin hubinta aqoonsiga (marka laga reebo codsiyada degdegga ah ee proxy). Lama rabo in aad keento aqoonsi sawir leh si aad cod u dhiibto wakiil ahaan, laakiin wakiilkaaga waa inuu keenaa aqoonsi sawir leh oo la aqbali karo si uu adiga kuugu codeeyo. Waxaa jira habab kale oo xaqiijin ah sida saxiixaaga iyo taariikhda dhalashadaada.

Warbixin cusub oo ku saabsan codbixinta wakiilka (proxy) waxaad ka heli kartaa:

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/ways-vote/apply-vote-proxy>

Haddii aad horay u lahayd heshiis codbixin wakiil ah, nidaam kumeel gaar ah ayaa jiri doona. Waxaad u cusboonaysiin kartaa wakiilkaaga adigoo la xiriiraya xafiiska deegaanka:

<https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Maxay yihiin Isbeddellada ku yimid codbixinta boostada (postal voting)?

Isbeddelladan cusub waxay dhaqan galeen 31-kii October 2023.

Marka codsigaaga codbixinta boostada la ansixiyo, wuxuu shaqayn doonaa ugu badnaan saddex sano. Kadib 3 sano, waa inaad mar kale codsataa haddii aad rabto in aad sii waddo codbixinta boostada.

Waxaad ka codsan kartaa codbixinta boostada online, ama haddii aadan online u codsan karin, waxaad foomka ka soo dejisan kartaa: <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> Kadibna waxaad u diri kartaa xafiiska deegaankaaga ama waxaad ka codsan kartaa in laguugu soo diro foomkaas boosto ahaan.

Faahfaahinta xafiiska deegaankaaga waxaad ka heli kartaa: <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Ma u baahnid aqoonsi sawir leh si aad cod ugu dirto boostada. Laakiin waxaa jiri doona hubin aqoonsi kale sida xaqiijinta saxiixaaga iyo taariikhda dhalashada. Warbixin cusub oo ku saabsan codbixinta boostada waxaad ka heli kartaa: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/apply-vote-post>.

Haddii aad horay u lahayd codbixin boosto ah, nidaam kumeel gaar ah ayaa jiri doona. Waxaad cusboonaysiin kartaa codsigaaga adigoo la xiriiraya xafiiska deegaanka: <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Haddii aadan awoodin in aad ku dirto codbixintaada boostada waqtigeeda, waxaad u qaadi kartaa goobta codbixinta ama xafiiska golaha deegaanka maalinta codbixinta. Cod-bixiyeyaashu waxay awoodi doonaan inay keensadaan kaliya codkooda boostada, iyo codadka boostada ee ugu badnaan shan (5) qof oo kale, goobta codbixinta. Ololayaasha (campaigners) waxa kaliya loo oggol yahay inay keenaan codkooda boostada, iyo codadka ugu badnaan shaqsiyaad shan ah oo kale oo ah qaraabo dhow ama dad ay si joogto ah u daryeelaan. Qof kasta oo keenaya codad boosta ah oo uu geeyo xafiiska maamulka deegaanka ama goobta codbixinta, waxaa looga baahan doonaa inuu buuxiyo farta celinta codbixinta boostada (postal vote return form).

Ma jiraa waqti kama dambays ah oo lagu codsan karo codbixinta boostada ama tan wakiilka (proxy)?

Haa, waxaa jira waqti kama dambays ah oo lagu codsan karo codbixinta boostada iyo wakiilka (proxy voting).

Waqtiga kama dambaysta ah ee codsiga codbixinta boostada waa 5pm, 11 maalmood oo shaqo ka hor maalinta doorashada.

Waqtiga kama dambaysta ah ee codsiga codbixinta wakiilka (proxy vote) waa 5pm, 6 maalmood oo shaqo ka hor maalinta doorashada.

Xasuuso, waa inaad buuxisaa codsi cusub oo codbixinta boostada ama wakiilka ah haddii aad guriga beddeshay ama magacaaga beddeshay.

Codbixinta si qarsoodi ah (Voting anonymously)

Waa maxay isdiwaangelinta qarsoon (Anonymous registration)?

Marka qof isdiwaangeliyo si uu u codeeyo, magaciisa iyo cinwaankiisa waxa uu ka soo muuqan doonaa diiwaanka codbixiyeyaasha (electoral register).

Haddii qof uu ka walwalo in magaciisa iyo ciwaankiisa oo lagu muujiyo diiwaanka codbixiyeyaasha uu khatar gelin karo ammaankiisa, waxa uu codsan karaa in uu si qarsoodi ah isu diiwaangeliyo.

Sidan ayay u muuqdaan galitaanka caadiga ah ee diiwaanka codbixiyeyaasha:

FBC412 Vella, John 59 Green Lane

BC413 Vella, Veronica 59 Green Lane

Sidan ayay u muuqdaan galitaanka qarsoon ee diiwaanka codbixiyeyaasha: BC602 N

“N” tu waxay muujinaysaa in diiwaankan uu la xiriiro qof si qarsoodi ah isu diiwaangeliyay. Tani waxay ka dhigan tahay in dadka si qarsoodi ah isu diiwaangeliyay ay wali awood u leeyihiin in ay codeeyaan, laakiin magacooda iyo ciwaankooda ma ka muuqan doonaan diiwaanka codbixiyeyaasha.

Ma isdiiwaangelin karaa si qarsoodi ah?

Qof kasta oo doonaya in uu si qarsoodi ah isu diiwaangeliyo waxa laga rabaa in uu::

- Buuxiyo foom codsi
- Sharaxaad ka bixiyo sababta ammaankiisa, ama ammaanka qof kale oo la deggan, halis ugu gelayo haddii faahfaahiisa lagu muujiyo diiwaanka codbixiyeyaasha
- Soo gudbiyo caddeyn taageeraysa codsiga
- U celiyo foomka codsiga, sharraxaadda, iyo caddeynta golaha deegaanka

Waxaad kala soo bixi kartaa hage ku saabsan isdiiwaangelinta qarsoon, oo ay wada diyaariyeen Electoral Commission iyo Women’s Aid, halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/resources/democratic-engagement-resources/supporting-domestic-abuse-survivors-register-vote-anonymously>. Foomka daabacan ee isdiiwaangelinta qarsoon waxaad ka heli kartaa: <https://www.electoralcommission.org.uk/sites/default/files/2021-02/Register-to-vote-anonymously-resident-in-England-0.pdf>.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad isugu diiwaangeliso si qarsoodi ah, waxaad la xiriiri kartaa dawlada hoose ee deegaankaaga. Si aad u hesho faahfaahinta xiriirka, geli postcode-kaaga halkan: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Waxaad isku diiwaangalin kartaa si qarsoodi ah wakhti kasta. Si kastaba ha ahaatee, waxaa fiican in aad sida ugu dhaqsaha badan u codsato, gaar ahaan haddii ay doorasho soo socoto. Taariikhda kama dambaysta ah ee isdiiwaangelinta codbixinta ee doorasho kasta waa la shaacin doonaa ka hor, balse sida caadiga ah kama dambaysta codsiga waa qiyaastii laba toddobaad ka hor maalinta doorashada.

Isdiiwaangelinta qarsoon waxay shaqayn doontaa hal sano oo keliya sidaa darteed waa in aad dib u codsataa sanad walba. Xafiiska diiwaangelinta codbixiyeyaasha ee deegaankaaga ayaa kula soo xiriiri doona marka la gaaro waqtiga dib u codsiga.

Waxaan isu diiwaangeliyay si qarsoodi ah; sidee bay shuruudda aqoonsiga sawirka (photo ID) u beddeshaa habka aan qof ahaan u codeeyo?

Muwaadiniinta si qarsoodi ah isu diiwaangeliyay ee doonaya in ay si toos ah uga codeeyaan goobta codbixinta, waxaa laga doonayaa inay soo bandhigaan Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon (Anonymous Elector’s Document) oo ah aqoonsiga sawirka la aqbalayo. Dukumeentigan wuxuu ka kooban yahay Lambarka diiwaangelinta cod-bixiyaha Iyo sawirkaaga Waxa uu soo saarayaa Xafiiska Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha ee deegaankaaga, ka dib marka la xaqiijiyo aqoonsigaaga. Ma isticmaali kartid wax kale oo aqoonsi ah haddii aad tahay cod-bixiye qarsoon. Marka aad u codeyso si toos ah, waxaa lagaa doonayaa inaad keento kaarka codbixinta (poll card) iyo dukumeentiga codbixiyaha qarsoon (Anonymous Elector’s Document).

Qof walba oo horey si qarsoodi ah isu diiwaangeliyay, ama qof isu diiwaangeliya si qarsoodi ah ka hor doorashada, waxa uu heli doonaa casuumaad uu kaga codsan karo Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon oo ka imaanaya

dawlada hoose ee deegaankaaga. Waxaad sidoo kale si toos ah ula xiriiri kartaa dawlada hoose ee deegaanka si aad u codsato dukumeentigaas. Si aad u hesho faahfaahinta xiriirka, geli postcode-kaaga halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Sideen ku codsadaa Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon (Anonymous Elector's Document)?

Marka aad codsanayso dukumeentigan, waxaa lagaa doonayaa inaad buuxiso xogta soo socota:

- Magacaaga
- Cinwaankaaga
- Taariikhda dhalashada
- Lambarkaaga Caymiska (National Insurance)

Haddii aadan garanaynin lambarkaaga National Insurance, waxaad ka raadin kartaa Warqadaha mushaarka (payslips) Warqadaha rasmiga ah ee canshuuraha, hawlgabka (pension), ama kaalmada (benefits) Haddii aadan heli karin lambarka, codsigaaga wali waad buuxin kartaa, kadibna waxaa lagaa codsan doonaa inaad bixiso caddeymo kale oo aqoonsi si laguugu xaqiijiyo, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan Shahaadada dhalashada Bayaan bangi (bank statement) Ama biilka korontada/biyaha (utility bill) dawlada hoose ee deegaankaaga ayaa kula soo xiriiri doona si ay arrintan u abaabulaan haddii aad ka qorto faahfaahinta meesha lagaala soo xidhiidhayo.

Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa qof ku yaqaanna inuu u sameeyo warqad markhaati ah (attestation) dawlada hoose ee deegaankaaga si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga haddii aadan haysan caddeyn kale oo la aqbali karo.

Dawlada hoose ee deegaankaaga ayaa ku siin kara faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan cidda samayn karta markhaatigaas. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka adiga oo gelinaya postcode-kaaga halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Sidee buu u egyahay Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon (Anonymous Elector's Document)?

Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon waxaa dusha sare kaga qoran erayada 'Elector's Document', wuxuuna muujinaynin in cod-bixiyuhu si qarsoodi ah isu diiwaangeliyay.

Dukumeentigan waxa uu ka kooban yahay:

- Taariikhda la bixiyay
- Sawirkaaga
- Lambarkaaga codbixiye (electoral number) kaas oo ka muuqan doona diiwaanka halkii magacaga iyo ciwaankaaga
- Aqoonsi gaar ah (appropriate identifier) oo ah iskudarka 20 xaraf iyo lambar oo uu soo saaro software-ka ay isticmaalaan Xafiisyada Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha

Haddii aad tahay codbixiye qarsoon, waa inaad wadataa Dukumeentigaaga Cod-bixiyaha Qarsoon marka aad tagto goobta codbixinta. Lama rabo inaad wadato wax kale oo ah aqoonsi sawir leh.

Maxaa dhici doona marka aad tagto goobta codbixinta?

Cod-bixiyeyaasha qarsoon waxaa looga baahan doonaa inay keenaan Kaarka codbixinta (poll card) Iyo Dukumeentiga Cod-bixiyaha Qarsoon.

Marka aad timaaddo goobta codbixinta Shaqaale goobta jooga ayaa ku soo dhaweyn doona:

1. Wuxuu kaa dalban doonaa kaarkaaga codbixinta – magac iyo ciwaan lagama rabo
2. Wuxuu raadin doonaa lambarkaaga codbixiye ee diiwaanka
3. Wuxuu hubin doonaa Dukumeentigaaga Cod-bixiyaha Qarsoon
4. Wuxuu kaa saari doonaa liiska, wuxuuna ku siin doonaa warqadda codbixinta (ballot paper)

Goobaha codbixinta waxaa laga heli doonaa meel gaar ah si aad ugu muujiso Dukumeentigaaga si gaar ah (private).

Tani waxay noqon kartaa qol gaar ah ama aag loo kala xaday iyadoo la adeegsanayo shaashad asturaada (privacy screen) waxay ku xiran tahay goobta.

Ma khasab baa in aan qof ahaan u codeeyo haddii aan si qarsoodi ah isu diiwaangeliyay?

Maya. Haddii aad doorbidayso in aadan si toos ah uga codeynin goobta codbixinta, waxaad codsan kartaa Inaad codkaaga dirto boosto (postal vote) Ama wakiil u dirato si uu kuugu codeeyo (proxy vote) Ma rabo aqoonsi sawir leh si aad u codsato ama ugu codeyso boosto ama wakiil ahaan. Laakiin wakiilkaaga waa laga doonayaa inuu keeno aqoonsi sawir leh oo la aqbalo si uu adiga kuu codeeyo.

Si aad ugu codeyso wakiil ahaan (proxy) ama boosto ahaan (postal), waa inaad ka codsato online: <https://www.gov.uk/apply-proxy-vote> or <https://www.gov.uk/apply-postal-vote>.

Haddii aadan awoodin in aad online ka codsato Waxaad soo dejisan kartaa oo buuxin kartaa Foomka codsiga codbixinta wakiilka (proxy vote): <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> ama Foomka codsiga codbixinta boostada (postal vote): <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> Kadib, foomkaas waxaad u diri kartaa Xafiiska Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha ee deegaankaaga, ama waxaad codsan kartaa in lagu soo diro boosto ahaan..

Faahfaahinta adeegga doorashooyinka ee degmadaada waxaad ka heli kartaa adigoo galinaya postcode-kaaga halkan: <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>.

Si aad u ogaato sida loo codeeyo si qarsoodi ah (anonymous voting), booqo: <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/ways-vote/how-vote-anonymously>.

Faa'iidooyinka isdiwaangelinta codbixinta iyo lahaanshaha aqoonsi sawir leh oo la aqbalayo

Waa maxay faa'iidooyinka isdiwaangelinta codbixinta iyo helitaanka aqoonsi sawir leh si aad u codeyso?

Isdiwaangelinta codbixinta waxay kuu oggolaanaysaa in aad ka faa'iidayso xuquuqdaada dimuqraadiyadeed ee asaasiga ah, taas oo lagu helay dadaal badan, oo aanay dhammaan dadka reer London heli karin.

Isdiwaangelinta codbixinta waxay sidoo kale kor u qaaddaa dhibcahaaga amaahda (credit score), sababtoo ah dadka amaah-bixiyaasha suurtagalka ah waxay isticmaalaan diiwaanka codbixiyeyaasha si ay u xaqiijiyaan magacaaga iyo ciwaankaaga. Diiwaanka codbixiyeyaasha sidoo kale waxaa loo adeegsadaa in lagu xusho dad u qalma inay ka qayb qaataan adeegga garsoorka (jury service) maxkamado ay fadhiyaan dad kala duwan waxay u badan tahay in ay keenaan go'aano caddaalad ah.

Adigaa go'aansanaya haddii aad rabto inaad codeyso ama aadan codeyn. Laakiin, marka aad iska hubiso in aad isdiwaangelisay oo aad haysato aqoonsi sawir leh oo la aqbalo, waxaad xaq u yeelanaysaa in codkaaga la maqlo oo aad ka hadasho arrimaha khuseeya Naftaada, Qoyskaaga, Bulshadaada, Mustaqbalka London iyo guud ahaan dalka.

Hannaanka codbixinta (Voting systems)

Waa maxay hannaanka codbixinta ee loo adeegsado doorashooyinka Duqa London iyo Golaha London Assembly?

Xeerka Doorashooyinka (Elections Act 2022) wuxuu keenay isbeddel ku yimid hannaanka codbixinta Duqa London. Hannaanka codbixinta Golaha London Assembly (golaha deegaanka).

Doorashada Duqa London:

Duqa London hadda waxaa lagu doortaa iyadoo la adeegsanayo hannaanka First-Past-the-Post. Waxaad cod u dhiibaysaa hal musharax, adigoo calaamad [X] dhigaya sanduuqa u dhow magaca musharaxa aad doorbidayso. Musharaxa helaa codadka ugu badan wuxuu noqonayaa Duqa London. Hannaankan sidoo kale waxaa loo adeegsadaa doorashooyinka Baarlamaanka UK / Guud ahaan dalka (General Elections).

Dowladdu waxay sheegtay in isbeddello lagu samayn doono nidaamka codbixinta doorashada Duqa Magaalada London isla markaana uu nidaamku ku soo noqon doono nidaamka codbixinta dheeraadka ah. Macluumaadkii ugu dambeeyay fadlan booqo [London Elects](#).

Golaha London Assembly (Golaha deegaanka london) waxa uu ka kooban yahay 25 xubnood (Assembly Members – AMs) 11 xubnood waxay metelaan guud ahaan London 14 xubnood waxaa lagu doortaa deegaanno doorasho (constituencies).

Xubinta Golaha London ee deegaankaaga (Constituency London Assembly Member)

Xubnaha deegaanka waxaa lagu doortaa hannaanka First-Past-the-Post. Waxaad codka siinaysaa hal musharax, adigoo calaamad [X] dhigaya sanduuqa u dhow magaca musharaxa aad doorbidayso. Musharaxa helaa codadka ugu badan ayaa noqonaya xubinta deegaankaaga ee Golaha London Assembly.

Xubnaha guud ee London (London-wide Assembly Members)

Xubnahan guud waxaa lagu doortaa iyada oo la adeegsanayo hannaanka Additional Member System. Nidaamkani wuxuu u beddelaa tirada codadka ay xisbiyadu helaan, si saami ahaan (proportionally) loogu qaybiyo kuraasta Golaha (AM seats) ee xisbiyadaas.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan doorashooyinka Duqa London iyo Golaha London Assembly waxaad ka heli kartaa London Elects: <https://www.londonelects.org.uk/changes-how-we-vote>.

Xogtayda

Yaa heli doona xogtayda haddii aan isdiiwaangeliyo ama codsado Shahaadada Aqoonsiga Cod-bixiyaha bilaashka ah (Voter Authority Certificate)?

Haddii aad ka walwalsan tahay in magacaaga iyo cinwaankaaga oo ka muuqda diiwaanka codbixiyeyaasha uu halis gelin karo ammaankaaga, ama ammaanka qof kula deggan, waxaad codsan kartaa in aad si qarsoodi ah isu diiwaangeliso.. Tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah isdiiwaangelinta qarsoon waxaad ka heli kartaa halkan: <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/register-vote/register-vote-anonymously>

Haddii aad horey si qarsoodi ah isu diiwaangelisay oo aad rabto in aad qof ahaan u codeyso, waxaa lagaa doonayaa inaad codsato Dukumeentiga **Cod-bixiyaha Qarsoon (Anonymous Elector's Document)**.

Macluumaad dheeraad ah ka akhri halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/register-vote/register-vote-anonymously#anonymous-electors-document>.

Haddii aad ka welwelsan tahay ammaanka xogtaada gaarka ah, gaar ahaan in lagu daro 'open register' (liiska furan) Open register waa liis dadka ka mid ah laga iibin karo hay'ado ama shirkado kale. Inta lagu jiro habka isdiiwaangelinta online-ka ah, waad dooran kartaa in lagaa saaro open register-ka (opt-out). Waxaad ku sii jiri doontaa 'full register', oo ay isticmaalaan adeegyada doorashooyinka ee degmada (sida in laguugu soo diro kaarka codbixinta), iyo in bangiyadu isticmaalaan marka la hubinayo Codsiyada amaahda Credit score-kaaga Tani waxay ka duwan tahay isdiiwaangelinta qarsoon, taas oo meesha ka saarta xogtaada labada liisba – open register iyo full register.

Astaanta sharciyeysan iyo tan dhijitaalka ah (Legal and digital imprints)

Waa maxay astaamaha sharciyeysan iyo kuwa dhijitaalka ah?

Astaanta sharciyeysan (kuwa daabacan) iyo astaanta dhijitaalka ah (kuwa internetka ama dhijitaalka ah) waxay muujinayaan cidda mas'uulka ka ah daabacaadda ama faafinta ololaha ama agabka siyaasadeed, iyo cidda loogu ololeynayo (sida: cidda bixisay kharashka) si loo helo hufnaan (transparency).

Tusaale ahaan, waa tan shaxda imprints-ka oo ay adeegsadaan la-hawlgalayaashayada iyo kuwa deeqda ka helay mashruuca:

“Waxaa taageeray Greater London Authority, City Hall, Kamal Churchie Way, London E16 1ZE. Waxaa daabacay oo xayeesiiyay [magaca ururka], [cinwaanka diiwaangashan ee ururka].”

Waxaad ka heli kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan imprints halkan:

<https://www.electoralcommission.org.uk/imprints>.

Alaabooyinka iyo ilaha dheeraadka ah ee laga heli karo – gaar ahaan kuwa dadka codbixiyeyaasha ah

Xaggee ayaan ka heli karaa agabyada la heli karo ee ku saabsan isdiiwaangelinta codbixinta iyo Aqoonsiga Codbixiyaha (Voter ID)?

Sanad kasta, GLA waxay diyaarsaa agab daabacan iyo dhijitaal ah oo lagu turjumay afafka ugu badan ee ay isticmaalaan bulshooyinka London.

Muuqaalka [animation-ka \(filim kartoon\)](#) “Register to Vote”, oo sharxaya isdiiwaangelinta codbixinta iyo aqoonsiga cod-bixiyaha, ayaa lagu turjumay 16 luqadood oo ah afafka bulshooyinka, oo ay ku jirto BSL (British Sign Language).

Su'aal kasta oo ka mid ah su'aalaha ku jira dukumeentigan waxa laga diyaariyay muuqaal turjuman oo BSL ah. Waxaadna ka daawan kartaa [playlist-ka BSL ee ku jira kanaalka YouTube ee London Gov](#).

Waxaad ka heli kartaa dhammaan agabyada dhijitaalka ah iyo kuwa la daabacay ee GLA Democracy Hub:

<https://registertovote.london/>. Sidoo kale, Electoral Commission waxay leedahay agabyo ay iyadu diyaarisay oo guud ahaan UK laga heli karo: <https://www.electoralcommission.org.uk/>.

Xaggee ayaan ka heli karaa agabyo iyo macluumaad gaar u ah bulshooyin kala duwan?

[Democracy Classroom](#) waa xarun agab wadaag ah oo ay sameeyeen hay'ado aan dhinacna u janjeerin si ay u siiyaan macallimiinta, shaqaalaha dhalinyarada, iyo wacyigeliyeyaasha agab ku saabsan wacyigelinta siyaasadeed oo aan eex lahayn. LGBT HERO waxay sameeyeen: Don't Lose Your Voice – LGBTQ+ Democracy Hub, oo ah xarun taageerta ka-qaybgalka dimuqraadiyadeed ee dadka LGBTQ+, gaar ahaan trans iyo non-binary.

Agabyo loogu talagalay dadka Gypsy, Roma, iyo Travellers waxaad ka heli kartaa:

<https://www.gypsy-traveller.org/news/fft-publish-voting-resources-for-gypsy-roma-and-traveller-people/> Royal National Institute of Blind People (RNIB) waxay diyaariyeen tilmaamo gaar ah oo loogu talagalay dadka aragga la' ee u baahan in goobta codbixinta wax laga beddelo si ay u helaan adeeg u qalma Voting and elections:: [Voting and elections: what you need to know | RNIB | RNIB](#)

United Response waxay diyaariyeen agab fudud oo la fahmi karo (Easy Read) oo ku saabsan sida siyaasadda u shaqeyso, sida loo codeeyo, iyo xuquuqdaada, taasoo qayb ka ah ololahooda My Voice My Vote: [My Vote My Voice](#)

Qofkee ayaan u codeeyaa?

Dhammaan agabka iyo hawlaha la xiriira ololaha wacyigelinta dadweynaha ee Voter ID iyo Toddobaadka Isdiiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha London ee ay qabanqaabiso GLA waa dhexdhexaad (impartial) oo aan wax xisbiya ku tiirsanayn.

GLA iyo Shout Out UK lagama fahmi karo in ay taageerayaan xisbi siyaasadeed ama musharrax gaar ah, sidaas darteed ma bixinayno wax talo ah oo ku saabsan sida ay dadweynaha London u codaynayaan. Mid ka mid ah waxyaabaha xiisaha leh ee ku jira isdiwaangelinta codbixinta iyo helitaanka aqoonsi sawir leh oo la aqbali karo waa inaad baran karto Yaa matalaya deegaankaaga ama dalkaaga, Iyo qofka aad rabto inuu ku metelo adiga iyo danahaaga. Waxaad sameyn kartaa baadhis adigoo booqanaya: <https://whocanivotefor.co.uk/> Kadibna waxaad go'aansan kartaa adigaa gaar ah.

Sideen codkayga u muujiyaa marka laga soo tago codbixinta?

Waxaa jira siyaabo badan oo aad codkaaga iyo aragtidaada u muujin karto marka laga reebo codbixinta:

- Bilaabid ama saxiixid codsiyo dadweyne (petitions): Si aad u bilaabato codsi, booqo: <https://petition.parliament.uk> . Haddii codsigaagu uu gaaro 10,000 saxiix, dowladda waxay ka bixin doontaa jawaab.
- La xiriir xildhibaanka (MP) ama wakiilka deegaankaaga: Haddii ay jirto arrin aad muhiim u aragto, waxaad la xiriiri kartaa xildhibaanka deegaankaaga ama wakiilka deegaanka adigoo Qoraya warqad, Diraya email Ama ka qaybgalaya kulan toos ah (surgery) Macluumaad dheeraad ah ka hel: <https://www.parliament.uk/get-involved/contact-an-mp-or-lord/contact-your-mp/> ama www.gov.uk/find-your-local-councillors
- Iskaa wax u qabso (Volunteer): Ka qeybqaado hawl aad u aragto muhiim Eeg fursadaha tabarucaadda: www.london.gov.uk/programmes-strategies/volunteering
- Ka qaybgal latashiyo dadweyne (Public Consultations): Dowladdu mararka qaar waxay qaban kartaa latashiyo dadweyne oo ku saabsan arrimo kala duwan, kuwaas oo noqon kara Sahanno online ah, Kooxo diiradda saara (focus groups), Kulammo dadweyne Iyo waxyaabo kale Dhammaan latashiyada hadda socda ee Dowladda UK ka eeg: <https://www.gov.uk/search/policy-papers-and-consultations>
- Ka qaybgal mudaharaadyo nabadeedyada: Xuquuqda mudaharaadka nabadeed waa xuquuqda aadanaha, inkasta oo dad badan oo dunida ah wali u halgamayaan helitaankeeda.
- Ka qaybgal abaabul bulsho (community organising): Waxaad ku lug yeelan kartaa ololeyaal ay dadweynuhu hormuud ka yihiin ama arrimo deegaankaaga khuseeya oo aad danaynayso.

Xasuusnow: Codantaadu waa codkaaga — codkaagu waa ka waxbadalaya! #CodaynLa'aanCodmalihid